# Ku saabsan soo gelidda Norway

Maqaal | La cusboonaysiiyey: 11.06.2021

Xeerka guud waa in ajnebiga deggan Norway oo keliya soo geli karaan waddanka. Muwaadiniinta Norway mar kasta way soo geli karaan waddanka. Si loo yareeyo cudurka ka imanaya dibeddaha, waxa sii jiri doono xayiraaddo soo gelitaan oo adag.

**Dadka aan soo geli karin Norway hadda (waxay khuseysaa dadka deggan dhammaan waddamada, xataa dadka deggan Midowga Yurub/Aagga Dhaqaale ee Yurub iyo waddamada woqooyiga Yurub (waddamada Noordigga):**

- Dalxiiseyaasha, marka laga reebo qaar yar
- xubnaha qoyska ah ee fog, sida awoowe/ayeeyo
- Saaxiibka/saaxiibadda ama qof in la is guursado lagula heshiiyey
- Ajnebiga (kuna jiraan dadka deggan waddamada woqooyiga Yurub) ee shaqo ama waxbarasho u imanaya Norway, oo aan ka mid ahayn dadka xeerka laga dhaafay ee hoos ku qoran
- Dadka la siiyey oggolaansho joogitaan si ay Norway uga shaqaystaan ama wax uga bartaan oo aan ahayn dad hore u degannaa waddanka
- Socdaalka arrimo ganacsi u imanaya waddanka
- Qof ajnebi ah oo la siiyey fiisaha waddamada Schengen, laakiin aan hoos imanayn qodobada dadka laga dhaafay xeerka ee hoos ku qoran
- Dadka guri-fasaxeed ku leh Norway, laakiin aan degganayn waddanka

**Dadka soo geli kara Norway hadda:**

- ajnebiga deggan Norway
- ajnebiga deggan waddan ama aag ku yaalla EØS/Schengen oo aan karantiilku waajib ku ahayn marka la eego xeer-hoosaadka covid-19 § 4 faqradda koowaad xarafka a, eeg lifaaqa A ee xeer-hoosaadka.
- ajnebiga la siiyey oggolaansho (sharci) ku salaysan midayn qoys

- ajnebiga booqanaya ama guri la degi doona dad ka mid ah qoyskiisa oo deggan Norway
- ajnabiga carruurtooda la yeelanaya kulan/is-arag lagu ballamay ama la go’aamiyey
- ajnebiga ku jira xaaladdo gaar ah oo amraya in qofkaas loo oggolaado soo gelidda waddanka, sida qofka masuuliyad daryeel ka saaran tahay dad jooga Norway, ama qaba xaaladdo nololeed oo waaweyn oo kale
- magangelyo-dooneyaasha iyo qaxootiga la soo qaatay
- dad xirfado/shaqooyin gaar ah leh. Suxufiyiinta, shaqaalaha badda iyo duulitaannada diyaaradaha, shaqaalaha gaadiidka badeecooyinka iyo dadka, diblomaasiyiinta iyo shaqaale ciidan, dadka Saamiga ah ee ku jira shaqada dhaqashada deerada, cilmi-baadheyaasha iyo xubnaha ka tirsan sahan cilmi-baadhis badeed ah
- ajnebiga ay dawladda Norway casuumtay ama shaqaalaha hay’addo/ururro caalami ah
- Ajnebiga diyaaradda ku beddelanaya garoon diyaaradeed oo ku yaalla Norway (duulitaannada caalamiga ah iyo kuwa Schengen gudaheeda ah ba)
- ajnebiga haya shaqooyinka bulshada aad ugu muhiimka ah
- shaqaalaha caafimaadka ee ka yimi iswiidhan ama Finland ee ka shaqeeya adeegyada caafimaadka iyo daryeelka ee Norway
- ajnebiga si joogto ah u deggan Svalbard, ama u baahan in ay sii dhexmaraan dhulka/berriga Norway iyagoo ku ama ka socda shaqo ama gurigooda Svalbard

## Haddii aad ka mid tahay dadka soo geli kara Norway, waa in aad ogaatid shuruudaha jira oo aad hoos ka akhrisan kartid:

Dadka waddanka soo gelaya waxa ku waajib ah tijaabo qaadista, diiwaangelinta soo gelidda waddanka, karantiil iyo weliba hoteel karantiil dadka qaarkood.

Xeerarka karantiilka ee ku khuseeya waxay ku xidhan tahay sida cudurku ugu badan yahay waddanka aad ka imanayso. Khariidadda Machadka Caafimaadka Dadweynaha ee muujinaysa waddamada/aagagga ku yaalla Yurub ee karantiilku waajib ku yahay qofkii ka yimaada waxa la cusboonaysiiyaa toddobaad kasta, saacadda 00:00 habeenka isniinta.

Ogow in Wasaaradda Arrimaha Dibeddu dadka kula talinayso in ay iska dhaafaan dhammaan safarrada laga maarmi karo ee dibedda lagu tegayo. Talooyinka safarradu waxa ay

soconayaan ilaa 1-da Julaay 2021. Waxa laga reebay waddammada iyo aagagga ku yaalla Woqooyiga Yurub iyo waddamada ku yaalla EØS/Schengen ee buuxinaya shuruudaha cudur yaraanta ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha. Faafidda cudurka iyo xayiraadaha maxalliga ayaa si degdeg ah isu beddeli kara oo xaaladda ka dhigi kara mid aan la qiyaasi karin. Qof kasta si wacan ha uga fekero in safarku muhiim yahay iyo in kale.

## Diiwaangelinta soo gelidda

Waa in qof kasta oo soo gelaya Norway, kana imanaya waddammada qofka ka yimaada ay waajib ku tahay in uu karatiil galo, waa in uu is diiwaangeliyo ka hor intaanu ka soo tallaabin xuduudda. Arrintani waxay khuseysaa xataa muwaadiniinta Norway. Dadka waddanka soo gelayaa waa in ay is diiwaangeliyaan **ka hor** xilliga ay soo gelayaan Norway, waxaana safarka la diiwaangelin karaa keliya marka wax ka yar 72 saacadood ka dhiman yihiin xilliga soo gelitaanka waddanka

- **Diiwaangelinta soo gelidda oo digitaal ah**

Waa in aad isu diiwaangeliso qaab digitaal ah. Marka la dhammeeyo diiwaangelinta waxa la helayaa raasiid la tusayo booliska marka la yimaado barta hubinta ah ee xuduudda.
Dadka socdaalka ah waxa laga rabaa in ay diiwaangeliyaan keliya macluumaadka lagama maarmaanka ah. Xogta waxa loo kaydinayaa si ammaan ah waxaana la tirtiri doonaa 20 maalmo kaddib. Dawladda Norway oo keliya ayaa arki karta xogta.
Haddii aad qabto su'aalo ama u baahan tahay in lagaa caawiyo diiwaangelinta, waxaad wici kartaa +47 33 41 28 70.
Zarejestruj telefonicznie +47 33 41 28 70
Inregistrat de telefon +47 33 41 28 70
регистрируйтесь по телефону +47 33 41 28 70
Registruokitės telefonu +47 33 41 28 70

## Karantiilka soo gelidda waddanka

Dadka soo gelaya Norway waa in ay caadi ahaan karantiilka ku galaan meel ku habboon  ama hoteel karantiil. Waxa karantiilkan laga dhaafayaa keliya dadka soo joogay waddamo/aagag cudurku ku yar yahay oo ku yaalla Aagga Dhaqaale ee Yurub (EØS) / Schengen iyo Ingiriiska (waddamada/aagagga "huruudda" ah).
Dadka si buuxda loo tallaalay ama covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay, ee markaana arrintaas u caddayn kara qaab la hubo oo la xaqiijin karo, ma u baahna in ay galaan karantiil soo gelidda waddanka wixii ka dambeeya Jimce 11-ka Juun saacadda 15.

Dadka difaacan ee tallaalka qaatay 3 ilaa 15 toddobaad ka hor, iyo carruurta ka yar 18 sanno waa in ay galaan karantiilka soo gelidda, waxaanay karantiilka ka bixi karaan haddii ay tijaabo cudurka laga waayey iska qaadeen ugu horreyn 3 maalmo kaddib markii ay waddanka soo galeen. Sida keliya ee qofku xilligan ku caddayn karo in uu difaacan yahay ayaa ah in uu galo bartiisa helsenorge.no oo loo arko in xogteeda la hubo lana xaqiijin karo. Dadka kale ee gelaya karantiilka waxa laga rabaa in ay tijaabo PCR ah iska qaadaan marka toddobada maalmood ka soo wareegto soo gelitaankooda. Haddii laga waayo covid-19 marka ay iska qaadaan tijaabo PCR (maaha tijaabada degdegga ah) waxa ay ka bixi karaan karantiilka. Dadka laga rabo in ay karantiil galaan marka ay soo galaan Norway, waxa caadi ahaan la rabaa in ay wakhtiga karantiilka oo idil ama qayb ka mid ah ku qaataan hoteel karantiil.

## Hoteel karantiil

Dadka socdaalka ah ee ka imanaya waddamo aan ku oollin EØS/Schengen iyo Ingiriiska waa in ay wakhtiga karantiilka ku dhammaystaan hoteel karantiil.
Socdaalka ka imanaya waddamo/aagag ku yaalla Aagga Dhaqaale ee Yurub (EØS) / Schengen iyo Ingiriiska oo ay dadka cudurka laga helay ka badan yihiin 150 qof halkii 100 000 ee qof, waa in ay joogaan hoteel karantiil ilaa inta la helayo tijaabo PCR ah oo cudurka laga waayey oo laga qaaday ugu horreyn maalinta 3-aad kaddib xilligii soo gelidda waddanka. Waxa ay karantiilka ku dhammaysan karaan guriga ama meel kale oo ku habboon oo dadka kale laga fogaan karo, oo leh qol gaar ah, suuli gaar ah, iyo jiko gaar ah ama cunto loo keenayo qofka.
Socdaalka ka imanaya waddamo/aagag ku yaalla Aagga Dhaqaale ee Yurub (EØS) / Schengen iyo Ingiriiska oo ay dadka cudurka laga helay ka yaraayeen 150 qof halkii 100 000 ee qof 14-kii maalmood ee u dambeeyey islamarkaana ugu badnaan boqolkiiba 4 dadka laga qaaday tijaabo laga helay cudurka, waa laga dhaafayaa joogidda hoteel karantiil. Waa in ay karantiilka ku qaataan guriga ama meel kale oo karantiil ku habboon.

- **Waddamada/aagagga ku yaalla EØS/Schengen ee hoteel karantiil waajib noqonayo iyo kuwa karantiilka lagu geli karo guriga ka eeg bogga internetka ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha.**

## Dadka difaacan waa laga dhaafi karaa hoteelka karantiilka

Dadka socdaalka ah waa laga dhaafi karaa hoteel karantiil haddii marka ay xuduudda yimaadaan caddayn karaan in la tallaalay ama covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay iyagoo isticmaalaya helsenorge.no. Carruurta waa laga dhaafaya hoteel karantiil haddii ay la socdaan dad difaacan. Xilligan caddaynta keliya ee la oggol yahay waxa ay tahay

in qofku galo bartiisa helsenorge.no. Waraaqo lala soo baxay ama sawir shaashadda laga qaaday ma noqon karaan caddayn.

## Nidaam dadka lagaga dhaafi karo hoteel karantiil

Waxa la bilaabay nidaam dad kooban loogu talogalay, oo dadka caddayn kara in ay jiraan xaaladdo nololeed oo waaweyni ay codsan karaan in laga dhaafo shardiga hoteelka karantiilka marka ay soo gelayaan Norway. Dad aad u yar ayaa qaabkan looga dhaafi karaa. UDI ayaa go’aan ka gaadha codsiyada noocan ah kana jawaabi karta su’aalaha ku saabsan nidaamkan. Halkan ka codso.

- **Aagag/waddamo kale ayaa lagu daray liiska meelaha qofka ka yimaada uu karantiilka ku qaadan karo gurigiisa/meel kale oo habboon (war-saxaafadeed 4. Juun 2021)**
- **Xeerarka guud ee soo gelidda waddanka iyo hoteel karantiil**
- **Macluumaad ku saabsan xaaladda cudurka ee Yurub ka eeg bogga internetka ee Machadka Caafimaadka Dadweynaha**

Shaqaalaha loo oggolaado in ay soo galaan Norway waa in ay ku dhaqmaan xeerar karantiil oo aad u adag. Xeerka guud waxa uu yahay in ay galaan hoteel karantiil. Faahfaahinta ka eeg qodobka hoose.

## Shaqaalaha iyo xeerarka karantiilka

Shaqaalaha loo oggolaado in ay soo galaan Norway waa in ay ku dhaqmaan xeerar karantiil oo aad u adag. Caadi ahaan waa in dadkaasi galaan hoteel karantiil.

Waxa xeerkan laga dhaafayaa shaqaalaha ama qandaraasleyda uu shaqo- ama qandaaraas-bixiyuhu u diyaariyey meel habboon oo ay joogaan oo ay Hay’adda Kormeerka Goobaha Shaqadu oggolaatay ka hor intaan la soo gelin waddanka. Waa in xilliga la soo gelayo waddanka la soo bandhigo wax caddaynaya in oggolaansho la helay.

- **Eeg foom codsi oo ku jira arbeidstilsynet.no**
- **Macluumaad dheeraad ah oo khuseeya shaqo-bixiyeyaasha oyo shaqaalaha ka eeg arbeidstilsynet.no**

## Waajibaadka iska qaadista tijaabo

Haddii aad xilli ka mid ah 14-kii maalmood ee u dambeeyey soo joogtay waddan ama aag uu karantiilku waajb noqonayo waa in aad iska qaaddo tijaabada koroonaha marka aad timaado Norway. Arrintani waxay khuseysaa xataa muwaadiniinta Norway, islamarkaana laga bilaabo 19-ka Abriil way khuseysaa carruurta ka yar 12 sanno.

Dadka diida in tijaabo laga qaado iyaga oo aan haysan sabab macquul ah waxa ay waddanka uga bixi karaan si ikhtiyaar ah ama waxa la siinayaa ganaax lacag ah.

Socdaalku waa in ay sida kalena soo bandhigaan tijaabo ah SARS-CoV-2 oo muujinaysa in laga waayey cudurka, marka ay waddanka soo gelayaan. Waa in ay ahaato mid la qaaday xilli ka mid ah 24-kii saacadood ee ka horreeyey soo gelidda Norway. Arrintani way khuseysa muwaadiniinta Norway iyo ajnebiga deggan Norway.
Dadka diyaarad ku imanaya, waxay tijaabada iska qaadi karaan xilli ka mid ah 24-kii sacadood ee ka horreeyey wakhtiga lagu talo galay in diyaaradda u horraysa ee safarku ay duusho.
Dadka si buuxda loo tallaalay ama covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay ma u baahna in ay wataan tijaabo cudurka laga waayey marka ay waddanka imanayaan, laakiin waa in ay tijaabo isaga qaadaan xuduudda.
Shuruudka
ku saabsan in la soo bandhigo caddayn ka waayitaan cudur ah waa laga dhaafayaa qofka haddii aanay suurtaggal u ahayn in uu helo ama culays weyn ku tahay qofka

### Khariidadda baraha hubinta xuduudaha ee furan

- **Khariidad muujinaysa meelaha xuduudaha laga soo talaabo ee furan ee leh ama aan lahayn meel tijaabo lagu qaado (Helsedirektoratet)**

### Telefoon laga helo macluumaad ku saabsan soo gelidda waddanka, tijaabo-qaadista iyo karantiilka

- Markaad joogto Norway: 815 55 015
- Markaad joogto dibedda: +47 21 89 80 42